

Tilmaamaha loogu talagalay Dhakhaatiirka ee ku saabsan Boogaha La xiriira Xylazine

Waa maxay xylazine?



Xylazine ("tranq") waa daawo xoolaha lagu dejijo 'tranquilizer' oo si sii kordhaysa looga helo dhanka keenista daroogada sharci darrada ah ee dalka oo dhan, gaar ahaan iyada oo ah mid wax washakeysan oo ku jirta fentanyl sharci darrada ah. Xylazine waa daawooyin lagu daaweyyo xaaladaha caafimaad 'alpha-2 adrenergic receptor agonist', oo aysan FDA oggolaanin in loo isticmaalo aadanaha. Sida fentanyl, xylazine waxay keeni kartaa hurdeystaan 'sedation', miyirka oo la lumiyo, neefsasho gaabis ah, hoos u dhaca dhiigga 'hypotension', garaaca wadnaha oo gaabis ah 'bradycardia' iyo ku tiirsanaan jireed. In kasta oo xylazine aysan ahayn opioid, naloxone waa in had iyo jeer la siiyaa dadka la tuhunsan yahay in ay qaateen daawo xad-dhaaf ah 'overdose' iyada oo la eegayo suurtgalnimada sare ee ku lug lahaanshaha opiod.



Boogo ay keeneen daroogada ka kooban xylazine.

Xylazine waxay sidoo kale keeni kartaa ciriiriga geesaha xiddidada dhiigga 'peripheral vasoconstriction' iyo boogo daran.

Dadka isticmaala daroogada ayay dhici kartaa in ay dib u dhigaan in ay raadsadaan daryeelka boogaha la xiriira xylazine si ay iskaga ilaaliyaan in la xukmiyo, si xun loola dhaqmo, ama la ceebeeyo. Waa muhiim in dadka lagula kulmo halka ay joogaan, loola dhaqmo si sharaf iyo ixtiraam leh, oo awood loo siiyo in ay ku lug yeeshaan adeegyada iyo nidaamyada. Habkani yareynta waxyeelladu wuxuu ugu dambeintii dadka ka taageeri karaa jidkooda rajada, bogsashada, iyo caafimaadka.



Sifooyinka boogta la xiriira xylazine

- Boogo kala duwan ayaa la soo sheegay in ay ka dhashaan wax la isku durayo, sigaar ahaan loo cabanayo, ama naqas ahaan loo qaadanayo fentanyl lagu daray xylazine.
- Booguhu waxay badanaa ku bilaabmaan finan iyo boogo qoto dheer oo ku yaala cirifyada, laakiin waxay ka soo muuqan karaan meel kasta oo ku taala jirka.
- Boogahani waxay u sameysmaan si dhakhso ah mana raacaan hababka bogsiinta boogaha ee caadiga ah. Waxay noqon karaan meel hoos u qodan "tunnel" ama waxay ku faafi karaan nudaha u dhow, murqaha, seedaha, iyo lafaha. Qolof qalalan 'eschars', nudayaasha soo bogsoonaya 'granulation tissue', nudayaasha dhintay 'necrotic tissue' ayay dhici kartaa in ay jiraan.

- Boogahani ayaa inta badan ah kuwo ka xanuun badan inta la filayo iyada oo ku saleysan muuqaalkoodii hore. Ogsoonow wixii cabashooyinka gaarka ee la xiriira xanuunka ku kooban meesha gaarka ah ‘localized pain’ xataa haddii boogtu u muuqato mid yar ama aan weli sameysmin.
- Maareynta boogaha la xiriira xylazine waxaa dhici karta in loo baahdo in la soo saaro nudaha dhintay ‘debridement’, nadiifin joogto ah, iyo dhaymo muddo dheer ah. Haddii ay jirto malax ‘purulence’ ama astaamo kale oo infekshan, daawooyinka antibiotics-ka ayaa la tilmaami karaa waana in ay ku jiraan daaweynta MRSA iyo bakteeriyyada Kooxda A
- Dadka leh boogo ka sii daraya ama astaamaha infekshanka nidaamsan waa in lagu qiimeeyaa daryeelka bukaan-jiifka. Isku gudbinta waaxaha adeegyada degdega ah iyo daryeelka bukaan-jiifku waa in uu ku jira qorshe lagu maareynayo ka bixida jidhka ‘withdrawal’ ee xylazine iyo opioid.

La-talinta ka hortagga boogta ee loogu talagalay bukaannada

- Kula tali bukaannada in ay:
 - » Iisticmaalaan ku dhaqanka wax isku durid ‘injection’ badbaado leh sida irbadaha ‘syringes’ iyo qalabka cusub, nadiifinta iyo wareejinta meelaha wax la iskaga duro, iyada oo afka hore ee irbada la isku duro kor u jeedo ‘bevel up’ oo xagal ahaan yahay 15-30° oo ah jihada wadnaha.
 - » U soco si tartiib ah iyo sida ugu taxaddarsan ee macquulka ah haddii aad wax ku durayso. Iska ilaali waxa ka soo daadanaya ‘leaking’ meel ka baxsan xiddidka ‘vein’.
 - » Marnaba wax ha ku durin boogta—waxay boogta ka dhigtaa in ay ka sii darto iyo waxayna ka hor istaagtaa in ay bogsooto.
- Hubi in bukaannadu ay fahamsan yihiin saameynta ay leedahay in ay si ula kac ah u raadiyaan waxyabaha lagu daro xylazine oo ku jira agabkooda.
- Ku dhiirigeli dadka in ay wakhti hore raadsadaan daaweyn astaamaha u horreyya ee boogta bilaabmaysa.
- Ka taxaddar in xanuunka ku kooban meesha gaarka ah ‘localized pain’ ee haya qofka laga yaabo in uu istimaalayo opioid lagu daray xylazine ay dhici karto in uu yahay calaamada digniinta ee in ay boogi bilaabmayso.



Daryeelka boogaha

- Boogaha oo dhan si joogto ah ugu nadiifo saabuun iyo biyo ama cusbo nadiif ah.
- Boogaha ka dhig kuwo nadiif ah, qoyan, heerkul nidaamsan leh, iyo kuwo la daboolay.
 - » Agabta daryeelka boogta ee gaarka ah, sida xeroform ayaa hadda la helayaa iyada oo la adeegsanayo [Xarunta Save Lives Oregon ee Yareynta Waxyeellada](#)
- Inkasta oo ay tahay in booguhu qoyaan ahaadaan, iska ilaali in aad wax badan geliso ‘overpacking’ boogaha iyaga oo keena raaxo darro sababi kara in qofka iska saaro shayga la geliyay.
- Tixgeli kareemka iyo boomaatada loogu talagalay maqaarka caafimaadka leh oo ku wareegsan boogta si loogga hortaggo in waxyeello dheeraad ahi soo gaarto nudaha. Maskaxda ku hay in kareem aad badani is horaagi doono in faashadu ku dhegto maqaarka.
- Iska ilaali in aad aalkolada iyo hydrogen peroxide u isticmaasho in aad ku nadiifiso ama boogta ka soo saarto ‘debride’ nudaha dhintay.
- Dadka u gudbi qof takhasus u leh daryeelka boogta haddii la heli karo.

La-talinta bukaanka ee loogu talagalay dhibaatooyinka caafimaad ee boogta

- Haddii boogtu noqoto mid dhimatay, nuduhu wuxuu u ekaan doonaan kuwo mugdi ah ama midab-doorsoomay. Isla markiiba raadso daryeel degdeg ah.
- Raadso daaweyn caafimaad oo loogu talagalay boogaha aan caadiga ahayn, booguhu u muuqdaan in ay infekshan yeesheen, ama haddii qof leeyahay astaamaha infekshanka, sida:
 - » Qandho
 - » Maqaarka oo diiran, guduudan, xanuun badan, ama bararsan meel u dhow boogta
 - » Dhiig ama malax ka socota boogta
 - » Ur xun oo ka imaanaysa boogta
- Calaamadaha in jawaab laga bixiyo infekshanka ‘sepsis’ waxay u baahan yihiin daaweyn caafimaad oo degdeg ah waxaana ka mid noqon kara:
 - » Xumad iyo/ama qarqaryo
 - » Jahwareer iyo wax kala garasho la’aan
 - » Neefsasho adag
 - » Garaaca wadnaha oo degdeg ah ama cadaadiska dhiigga oo hooseeya
 - » Maqaar dhidid leh ama qoyan
 - » Soo saarida kaadida ee yaraata
- Boogaha daran ee u adkeysta bogsashada ama la xiriira dhibaatooyinka caafimaad ee kor ku xusan ayay dhici kartaa in ay u baahdaan in la sameeyo faragelin dhanka qalliin ah, oo ay ku jiraan lugta oo la gooyo mararka qaarkood.



WAAXDA CAAFIMAADKA DADWEYNAHA

Barnaamijka Ka hortagga Dhaawaca & Rabshada

WAAXDA CAAFIMAADKA HAB-DHAQANKA

Qaybta Daaweynta Ku tiirsanaanta Mukhaadaraadka iyo Ka hortagga (ATRP)

Waxaad heli kartaa dokumentigan oo ku qoran luqaddo kale, far waaweyn, farta dadka indhaha aan qabin wax ku akhriyaan ee braille ama qaabka aad doorbidayso oo lacag la’aan ah. Barnaamijka Ka hortagga Dhaawaca & Rabshada kala xiriir IVPP IVPP.General@odhsoha.oregon.gov ama 971-673-1222 (cod/qoraal). Waan aqbalnaa wicitaanada gudbinta oo dhan.

Barnaamijka:

<https://www.oregon.gov/oha/PH/PREVENTIONWELLNESS/SUBSTANCEUSE/OPIOIDS/Pages/FentanylFacts.aspx>